

Indha Kuusu Waxay Sumayn Kartaa Ilmahaaga

“Gabadhayda waxaa ay ku sumawday indha kuusha Waan garan karaynay inay xanuunsanaysay. Dhakhtar ayaa ka baadhay dhiigeeda lead. Waxaan moodayay in indha kuushu ay caafimaadka aanay waxba yeeleynin maadaama oo ay dabiici tahay. Iminka waan ogahay inay lead uu leeyahay, taas oo caruurta waxyeesha.” – Hooyo Qaxooti ah

Caruur marsan indho kuul indhaha



Lead-ku Waa Sun

- Badanaa indha kuusha laga keeno Eeshiya, Afrika, iyo Bariga Dhexe waxa ay leedahay lead. Kuwaas oo mudo dheer isticmaalayay indha kuusha. Waxaan ognahay inuu khatar yahay.
- Caruur badan oo ku nool Maraykanka ayaa laga baadhay waxaana laga heley lead aad u badan kaas oo ay ka qaadeen indha kuusha. Indha kuusha waxaa sidoo kale loo yaqaanaa “kwallu” “tiro” “surma,” “kohl,” “gajal,” “kahal,” ama “al-kahal.”
- Lead-ku waxa uu waxyeeli karaa maskaxda waxaana ilmaha ku adkaanaysa **waxbarashada, inuu wax usoo jeedsado, iyo habdhaqanka.**

Lead-ku waxa uu geli karaa indhaha iyo afka oo waxa uu sumayn karaa caruurta

Ha Isticmaalin

Ha isticmaali waxyaabaha indha kuusha ah sidan oo kale. Waxaa dhici karta inay leeyihiin lead aad u badan.



Isticmaal Waxyaabo Ka Badbaado Badan

Isticmaal alaabka laga keeno Maraykanka ama Yurub sida “Kajal” oo ay sameeya Maybelline iyo “Infallible” oo ay samayso L’Oréal.



Iska baadh

- Dhakhtarkaaga ka dalbo inuu ku sameeyo shaybaadhka lead ilmahaaga.
- Inaad iska baadho lead-ku waa qaabka kaliya ee loo ogaanayo hadii uu qofku ku sumoobay.

Wixii macluumaad dheeraad ah



**Region 1: New England
Pediatric Environmental Health
Specialty Unit (PEHSU)**

617-355-8177
www.childrenshospital.org/pehsu



Macluumaadkan waxaa ansixisay American College of Medical Toxicology (ACMT) waxaana maalgaliyay (qayb ahaan) heshiiska wada shaqaynta ee FAIN: SU61TS000238-05 oo ka socda Hay'ada Duwaanka Xanuunada iyo Waxbaaha Lagu Sumoobo (Agency for Toxic Substances and Disease Registry) (ATSDR).

Waxaa la qirayaa: Hay'ada Ilaalaha Deegaanka Maraykanka (The U.S. Environmental Protection Agency) (EPA) oo ay taageertay PEHSU inay siisay deeqada ay ku maal gelinaysa ATSDR kaas oo hoos yimaada heshiiska Hay'ada U Dhaxeeya ee lambarkiisu yahay DW-75-95877701. EPA iyo ATSDR ma galaan wax ii ah oo alaabaadka iyo adeegyada laga ganacsado ah ee lagu sheegey baahinta PEHSU.